



Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa laga codsanayaa inay ka qeybgalaan tartan lagu galayo SafeOregon PSA

Miyaad tahay arday xiiseynaya inuu gargaar ka geysto sidii loo horumarin lahaa nabadgelyada iskuulada adiga oo fursad u haysta in aad ku guuleysato lacag dhan \$1,000 doolar? Haddii aad tahay arday xiiseysanay, fadlan waxaad tixgalisaa in aad ka qeybqaadato tartankaa Wargelinta Addeegga Dadweynaha (PSA) SafeOregon.

Dhammaan ardayda wax ka barta Dugsiga Gobolka waxaa lagu martiqaadayaa inay ka soo qeybgalaan sidii loo abuuri lahaa Wargalinta Addeegga Dadweynaha loona hourmarin lahaa SafeOregon, barnaamijka waxaa maalgaliyey Golaha Xeer-dejinta Oregon oo qeyb ka ah dadaalada kor loogu qaadayo nabadgelyada iskuulada. Barnaamijka SafeOregon wuxuu siinayaa gabaad uu ku nabadgalo qof kasta oo soo sheega xaalad khatar keeni karta ee la hubo ama wax uu ka shakiyo isaga oo aan magaciisa sheegin, sida rabshad khatar ah, dagaal, daroogo iyo khamro, hub, handadaad, cago-jugleyn, cabsi gelin ama qof naftiisa khatar galinaya.

Daawadayaasha Wargelinta Addeegga Dadweynaha(PSA) waxay ku dhiirigalinayaa in ay isticmaalaan SafeOregon oo ay la wadaagaan wararka qarsoodiga ah ee ku saabsan khatarta ama khatarta ku iman karta nabadgelyada ardayda. Barnaamijka Wargalinta Addeegga Dadweynaha waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo online, bulshada dhexdeeda, iyo sidii iskuulada loogu caawin lahaa sidii ay ula xiriiri lahaayeen dadweynaha. Muuqaalka Fiidiyaasha waxaa suurtagal inay ku jiraan kuwo si dhab ah ay SafeOregon u isticmaalayso, faa'iidada isticmaalka SafeOregon, iyo sida SafeOregon ay idiin caawisay ama ardayda kale dareemaan nabadgelyo marka ay iskuulka ku sugan yihiin.

Waxaa booqataa [Shabakada Tartanka SafeOregon](#) marka aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.